Qiimayn Xaaladeed, May2019

Shaqaaqada Kismaayo iyo saamaynta ay ku yeelan karto doorashada soo socota

Hordhac

Waxaa magaalada Kismayo ee xarunta ku meel-gaarka ah ee maamul-goboleedka Jubaland (JL) isku rasaaseeyay maalinimadii Khamiista, 9 Abriil 2019, ciidamo ilaalo u ahaa afhayeenkii hore ee Jubaland Cabdinaasir Seeraar Maax, iminkana ah musharax u tartamaya xilka madaxweynanimada JL iyo ciidmo kamid ah kuwa maamul-goboleedka.

Is rasaasaynta oo sida muuqata ku dhacday qaab aan qorshaysnayn waxaa ku dhintay ugu yaraan hal askari labo kalana waa ku dhaawacmeen[1.] Dhacdadan waxa ay sii hurisay khilaafkii siyaasadeed ee u dhexeeyay maamul-goboleedka iyo siyaasiyiinta u tartamaysa xilka madaxweynanimada oo xilliyadan dambe saldhig ka dhigtay Muqdisho iyo madaxweynaha xilligan ee maamul-goboleedka Axmed Maxamed Islaan "Madoobe", dhanka kalena waxa ay dhacdadan sii fogaysay rajadii laga qabay xal u helida khilaafkii u dhexeeyay dawladda dhexe iyo maamul-goboleedka JL.

Falceliskii ugu horeeyay ee ka yimid musharax madaxweyne Cabdinaasir Seeraar waxaa u ahaa in uu ku tilmaamay Axmed Madoobe mid furay albaabadii naarta oo uu ula jeedo in xasiloonidii JL geed sare ku laalantay [2.]

Dhinaca JL war-saxaafadeed ka soo baxay xafiiska wasiirka wasaaradda warfaafinta, isgaarsiinta iyo tiknoolojiyada ee maamul-goboleedka ayaa ku eedeeyay Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) inay ka dambayso shaqaaqada ka dhacday gegida diyaaradaha ee Kismaayo[3].

Haddaba qoraalkan kooban waxa aan ku qiimaynaynaa xaaladda ka dhalatay shaqaaqada ka dhacday Kismaayo iyo saameynteeda mustaqblka.

Dhismihii JL

Dhismaha maamulka JL waxa ay diyaarintiisu bilaabantay bartamihii sanadkii 2009 xilli deegaanada JL oo idil ay ku jireen gacanta Xarakada Shabaab. Diyaargarawga oo isugu jiray mid ciidan iyo mid siyaasadeed, kuma koobnayn Soomaalida oo keliya ee waxaa gacan weyn ku lahaa dawladaha gobolka gaar ahaan Kenya iyo Itoobiya oo iyaga oo adeegsanaya Urur Goboboleedka IGAD shirar isdaba joog ah ku qabtay Kenya iyo Soomaaliya gaar haan magaalada Kismaayo.

Dedaaladii lagu dhisayay JL waxa ay ku soo beegmeen xilli kala guur ah, kadib markii horraantii bishii Oktober 2012 ay ciidamada Axmed Madoobe oo ay gacan siinayaan kuwa Kenya ka saareen Xarakada Shabaab magaalada Kismaayo. Taa oo imanaysa todbaadyo kadib doorashadii madaxweynaha ee uu xilka ku hantay madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, waxaana durbadiiba dhashay is-faham waa u dhexeeya jabahaddii Axmed Madoobe iyo siyaasiyiintii la jaalka ahayd ee ka shaqaynayay dhismaha maamulka JL iyo maamulkii madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud iyo dhinaca kale dawladihii gacanta ku lahaa yagleelidda maamulka (Kenya iyo Itoobiya) iyo dawladda Soomaaliya. Is-faham waagaasu waxa uu keenay in dhiig badani ku daato magaalada Kismaayo kadib markii Axmed Madoobe iyo siyaasiyiintii la jaalka ahaa ay muquuniyeen siyaasiyiintii ka soo horjeeday qaab-dhismeedka maamulka la yagleelayo, khilaafkuna waxa uu u sii tilaabay

dawladda Soomaaliya iyo dawladaha Kenya iyo Itoobiya oo gacan ku lahaa dhismaha maamulka.

Sanadkii 2012 wax uu dhamaaday iyada oo xiriirka dawladda dhexe iyo JL aanu hagaasanayn, sidoo kalna dawladda Soomaaliya ay la hardamayso dawladaha la jaarka ah oo ay isku maan-dhaafeen dhismaha maamulka JL oo ay Soomaaliya u arkaysay in iyada oo qura looga dambeeyo.

Heshiiskii dawladda dhexe iyo JL

Dedaal badan kadib waxa dawladda Soomaaliya ay ku guulaystay inay xal bilow ah u hesho is-maandhaafkii kala dhexeeyay JL, kadib shir ku dhexmaray magaalada Addis Ababa madaxdii JL iyo mas′uuliin ka tirsan dawladda Soomaaliya, waxaana kulankaa qeyb ahaan lagu soo af-jaray khilaafkii, iyadoo kulamo kuwaa daba socda ay ka dhaceen Muqdisho iyo Kismaayo, ugu dambayntiina JL waxa ay xubin firfricoon ka noqotay Madashii Wadatashiga Hogaamiyayaasha Qaranka (MWHQ) ee ay ku kulansanaayeen mas′uuliinta ugu saraysay dawladda dhexe iyo madaxda maamul-goboleedyada, taasoo si wadar-ogol ah loogu jaangooyn jiray geeddi-socodka hanaanka wadaaga siyaasadda iyo kheyraadka dalka.

Waxaase halkiisa ka sii jiitamayay tan iyo dhismihii JL ilaa iyo maanta tabashooyinkii qaar kamida beelaha dega JL ay ka qabeen welina ka qabaan hanaanka awood qeybsiga, helitaanka mashaariicda horumarineed, hanashada deegaanada weli baaqi ku sii ah gacanta Xarakada Shabaab, iyada oo ay intaa dheer tahay in siyaasiyiinta ka aragtida duwan maamulka JL ay ku adkaatay inay ku sii negaadaan Kismaayo iyaga oo dhaliilahooda muujinaya.

Doorashadii madaxweyne Maxamed C/llahi Farmaajo

Ka dib doorshadii madaxweyne Maxamed C/llahi Farmaajo ee 8dii Febaraayo 2017, waxa ay dawladda dhexe la timid hanaan siyasadeed oo ka duwan kii talo-wadaaga ahaa oo ay madaxda dawladda dhexe iyo kuwa maamul-goboleedyada si wadar-ogol ah ugu jaangoyn jireen masiirka siyaasadeed ee dalka.

Madaxweyne Farmaajo oo ka duulayay in hanaankaa talo-wadaaga ah uu wiiqayo awoodda dawladda dhexe, karaamo dilna ku yahay madaxda sare ee dalka, isla markaana aaminsan in gobaladu metalaad ku leeyihiin golayaasha hogaamineed ee dalka (sharci-dejin iyo fulin) waxa uu laalay Madashii Qaran ee ay ku kulmi jireen madaxda dawladda dhexe iyo kuwa maamul-gobleedyada. Wuxuuse madaxweynuhu ka fursan waayay si loo hirgeliyo qorshihii dhismaha hay'adaha amniga dalka in uu sameeyo madal cusub maadaama aysan suurogal ahayn in la gudo galo qorshaha amniga iyada oo aanay talo ku lahayn hogaamiyayaasha maamul-goboleedyada, sidaana waxaa ku dhashay Golaha Amaanka Qaranka (GAQ) oo bedlay kii MWHQ, inkasta oo markii dambe shaqooyinka GAQ u xuub siibteen kuwii MWHQ, taasoo tusaalo loo soo qaadan karo shirkii GAQ ee Baydhabo, June 2018 kaasoo looga hadlay hanaanka doorashooyinka iyo wadaaga kheyraadka.

Bilawga khilaafka dawladda dhexe iyo JL

Khilaafka dawladda dhexe iyo JL ma aha mid gaar ku ah JL ee waa mid ku salaysan aragtida siyaasadeed ee madaxweyne Farmaajo taasoo ah in maamul-goboleedyadu yihiin kuwa kaalintoodu ay ku kooban tahay u adeegidda danaha deeganada ay maamulaan, hawsha dawladda dhexana ay uga dambeeyaan golayaasha dawladda oo ay ku leeyihiin xubno matala, sidaa darteed ayaa waxa uu khilaaf ka dhex qarxay madaxweynaha Galmudug Axmed Geelle Ducaale "Xaaf" iyo dawladda dhexe kadib markii uu madaxweyne Xaaf booqasho ku tagay dalka Isutaga Imaaraadka Carabta, khilaafkaa oo

abuuray in Galmudug ay u kala jabto laba qeybood[4], sidoo kale waxa ay aragtidan siyaasadeed ee madaxweyne Farmaajo saamaysay madaxweynihii hore ee Koofur Galbeed Shariif Xasan Sheekh Aadan oo ka haray tartankii xilka madaxtinimada maamulkii uu madaxweynaha ka ahaa 2014-2018, iyada oo la aaminsan yahay in uu cadaadis uga yimid dawladda dhexe oo u arkaysay inuu yahay maskaxda ka dambaysa dhaqdhaqaayada maamul-goboleedyadu isaga caabinayaan dawladda dhexe[5].

Maadaama aysan siyaasadda madaxweyne Farmaajo ahayn mid ku kooban JL, dareen kasta oo ay dawladda dhexe ka qaaddo dhaqdhaqaayada maamul-goboleedyada, gaar ahaan kuwooda ay u aragto inay u soo tilaabayaan xudduuda dawladda dhexe waxa ay ka bixinaysay jawaab, waxaase xusid mudan in shir sida la sheegay ay isla ogaayeen dawladda dhexe iyo mamulka JL in lagu qabto Kismaayo, dabayaaqadii 2017, kaasoo ujeedadiisu ahayd isu soo dhaweynta madaxda dawladda dhexe iyo maamul-goboleedyada uu isu bedelay dhimbishii hurisay khliaafka dawladda dhexe iyo maamulka JL.

Sida ay sheegeen madax dhawra ah oo ka tirsan maamulka JL, dawladda dhexe ayaa bixisay kharashka shirkii ugu horeeyay ee ay madaxda maamul-goboleedyadu ku yeesheen magaalada Kismaayo horrantii bishii Oktoobar 2017 si la isugu soo dhaweeyo xiriirada wada-shaqeyn ee maamul-goboleedyada iyo dawladda dhexe, waxaase muddo yar kadib soo if baxay madmadow hareeyay xiriirka garwadeenkii shirka madaxweyne Axmed Madoobe iyo dawladda dhexe, kadibna waxa shirku la kawsaday gulufkii dawladda dhexe ku qaaday madaxweyne Xaaf si xilka looga tuuro, waxa uuna isu bedelay shirkii Kismaayo madal iskaashi oo ay leeyihiin maamul-goboleedyada, ujeedada ugu weyna ay tahay iska caabinta culeysyada kaga imanaya dawladda dhexe.

In maamulka JL u noqday bud-dhigaha madashan waxa ay soo af-jartay rajo kasta oo laga qabay in is-faham iyo wada-shaqayn macno leh ay dhexmarto dawladda dhexe iyo maamulka JL. Halkaana waxaa ka bilawday is xulufaysi siyaasadeed oo dawladda dhexe iyo maamulka JL uu mid kasta kaga gaashamanayo culeysyada kaga iman kara dhanka kale.

Siyaasiyiinta iyo dhaqanka JL ee Muqdisho jooga

Khilaafka ka dhex aloosmay dawladda dhexe iyo maamulka JL waxaa uu fursad u abuuray siyaasiyiin isu arkayay inay buuxin karaan kaalinta Axmed Madoobe, waxayna baadigoob u galeen sidii xiriir dhaw ay ula sameyn lahaayen dawladda, oo ay dareensanaayeen in ay baahi u qabto inay hesho ciddii baddali lahayd madxweynaha maamulka JL, marka xilligiisu dhamaado. Sidoo kale waxaa dhaqdhaqaaq kaa la mid ah bilaabay qeybo kamida dhaqanka deegaanada JL oo saldhig ka dhigtay magaalda Muqdisho, kadib markii ay iyaga iyo siyaasiyiintuba ku adkaatay inay ku sugnaadaan magaalada Kismaayo ayaga oo ka soo horjeeda siyaasadaha maamulka, waxayna magaalada Muqdisho martigalaisay kulamo looga hadlayo arrimaha la xiriira doorashada JL ka dhici doona, qeybta dambe ee sanadkan 2019, waxaana kulamadaa qaarkood looga dhawaaqay ururo iyo isbahaysiyo ay ku midaysan yihiin siyaasiyiin iyo weliba mid gaar u ah musharaxiinta u tartamaysa xilka madaxtinimada JL.

Dhaqdhaqaayada Muqdisho waxaa barbar socday kulamo kale oo ka dhacay Nairobi, Dolow iyo Garbahareey, iyadoo mararka qaar magaalada Garbahareey laga abaabulay dibad-baxyo looga soo horjeedo maamulka JL, kuwaasoo qaarkood ay waxyeello ka soo gaartay madax ka tirsan maamulka[6]. Inkasta oo aanay jirin caddeymo sugan oo muujinaya in dawladda dhexe gacan ku leedahay dibad-baxyada ka dhacay Garbahareey haddana waxaa la tuhunsan yahay in siyaasiyiinta iyo dhaqanka Muqdisho saldhigtay ay si un saamayn ugu leeyihiin. Waxaase xusid mudan in siyaasiyiinta iyo waxgaradka deegaanka ay ka hortageen in xiriirka Kismaayo iyo Garbahareey uu u xuub siibto sida xiriirka u dhexeeya Cadaado iyo Dhuusamareeb, taasoo haddii ay dhacdo culays amni iyo mid siyaasadeed ka abuuri lahayd deegaanada JL.

Khilaafka dawladda dhexe iyo kan mamulka JL waxa uu gaaray heer uu hakiyo wadashaqayntii labada dhinac, hawlihii dawladda dhexe iyo talooyinkeedii ayaa ka fuli waayay JL, halka maamulka JL uu waayay dhaqaalihii uu qoondada u lahaa iyo kuwii horumarineed ee deeq-bixiyaayshu u soo marin jireen dawladda dhexe. Mararka qaarna

waxaa dhacaysay in madaxda maamulka JL ay kala kulmaan madaxda dawladda dhexe falal aan raalli gelin hadii ay ahaan lahayd dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, gaar ahaan gegida diyaaradaha Muqdisho[7] iyo shirarka calamiga ah ee ay wadajir uga qeybgalaan dawladda dhexe iyo maamul-goboleedyada[8].

Khilaafku wuxuu geeddi soo ahaadaba waxa uu figta uga saraysa gaaray markii ay soo bexeen warar sheegaya in dawladda dhexe ay hawlagallo milatari ka bilaabi doonto gobalka Jubada Dhexe, gacantana ay ku dhigi doonto magaalada Bu'aale ee caasimadda JL, oo xilligan ay Xarakada Shabaab gacanta ku hayso, waxaana arrinkaasu sii xoogaystay markii taliyihii ciidamada xoogga dalka qeybta JL (qeybta 43aad) Sarreeye Guuto Cali Maxamed Maxamuud "Bagmadow" oo ay dawladda dhexe magacawday uu maamulka JL ka hor istaagay in uu saldhig ka dhigto Kismaayo, iyada oo doodda maamulku tahay in habraaca magacaabistu ay wax ka qaldan yihiin, taasoo keentay in taliyaha la magacaabay uu saldhigto gobolka Gedo[9].

Dhacdadani waxay horseeday in maamulka JL dhankiisa uu ka bilaabo abaabul ciidan oo ku aadan gacan ku dhigista magaalada Bu'aale, oo halkii uu diyaargarowga dawladda dhexe ka ahaa hadal-hayn keliya, waxaa maamulka JL uu guda-galay inuu u dhaqaajiyo ciidamadiisa dhanka Bu'aale[10], isaga oo adeegsanaya gaadiid isugu jira cir iyo dhul. Waxaana arrintan sii cusleeyay dhaxalkii uu reebay qalalaasihii ka dhacay Baydhabo maalmo ka hor doorashada madaxweynaha Koofur Galbeed, arrinkaasina waxa uu muujiyay ifaaflo ah in khilaafka dawladda dhexe iyo maamulka JL isu bedeli karo isku dhac ciidan oo keena khasaare nafeed iyo mid hantiyeed haddii hawlgalka Bu'aale uu ka iman lahaa labada dhinac.

Dedaaladii dib u heshiisiineed ee dawladda dhexe iyo JL

Khilaafka dawladda dhexe iyo maamulka JL waxana barbar socday dedaalo heerarkoodu iyo dadka hogaaminaya ay kala duwan yihin, kuwaa oo la isugu soo dhaweynayo labada dhinac, waxaana dedaaladaa ugu dambeyay, kulan ka bilowday Nairobi, kadibna ka dhacay Kismaayo, laguna soo gabgabeeyay Muqdisho, kaasoo ay si toos iyo dadab ah uga qeyb qaateen madaxwyne Farmaajo, ra'iisal wasaare Xasan Kheyre iyo madaxweyne Axmed Madoobe[11].

Mararka qaar waxaa dedaalada loogu kala dab-qaadayo madaxda dawladda dhexe iyo maamulka JL qeyb ka ahaa madax ka socota dowladda Kenya[12], madaama Kenya markii horana ay gacan ku lahayd dhismaha maamulka JL, ciidamadeeduna JL ka howlgalaan, qulqulatooyinka deegaankaa ka dhacana ay saamayn toos ah ku yeelanayso amaanka Kenya.

Si kasta oo la isugu deyay in khilaafka xal loo helo laguma guulaysan, dawladda dhexe waxa ay is tustay in Axmed Madoobe oo meesha dhaafa mooyee aanay suurogal ahayn in is-faham dhex maro dawladda iyo maamulka JL, dhanka kalana Axmed Madoobe waxa uu ku mintiday inuu iska caabiyo arrin uu u arko inay tahay gardarro kaga imanaysa dawladda dhexe, sidaa darteed ayuu waxa uu awoodiisa isugu geeyay in uu diyaariyo hanaankii doorashada haddii ay ahaan lahayd sharciga doorashada, dhismaha gudiga doorashada iyo sugidda amniga doorashada, iyada oo ay gebi ahaanba mesha ka maqan tahay kaalintii dawladda dhexe iyo tii siyaasiyiinta iyo dhaqanka JL.

Qabsoomidda doorasho waafaqsan sharciyada dalka

Khilaafka u dhexeeya dawladda dhexe iyo maamulka JL waxa uu meesha ka saaray in si talo-wadaag ah looga shaqeeyo hanaanka doorashada oo isugu jira xulista xubnaha baarlamaanka JL iyo doorashada madaxweynaha. Dawladda dhexe waxa ay ku mashquushay la faltanka Axmed Madoobe, iyada oo innaba ha yaraatee aan dedaal ku bixin inay gudato kaalinteedii kaga aadanayd inay talo ku yeelato hanaanka doorashada JL oo uu si cad u qeexayo dastuurka JL[13], mana jirto wax war (qoraal ama oraah) ah oo ay dawladdu ka soo saartay tilaabooyinka u qaaday maamulka JL oo ku aadan doorashada soo socota.

Taa badalkeed waxa ay siyaasiyiinta iyo dhaqanka ku hawlan doorashada JL ee saldhigoodu Muqdisho yahay ay ka shanqarinayaan in dawladdu ka shaqaynayso kala doorashada musharaxiinta ay taageeri lahayd iyo sidii ay ula wareegi lahayd amaanka magaalada Kismaayo iyada oo adeegsanaysa ciidamada AMISOM.

Haddaba haddii uu warkaasi run noqdo, is rasaasaynta dhex martay ilaalada Cabdinaasir Seeraar iyo ciidamada maamulka JL waxa loo fahmi karaa inay tahay tilaabo gogol xaar u ah qorshe ay dawladda dhexe kula wareegayso amaanka Kismaayo, taasoo aan ka marnaan doonin in ay saamayn taban ku yeelato xasiloonada JL.

Cabdinaasir Seeraar waa saamile waqti badan ku bixiyay dhismaha maamulka JL, taageero xoogganna ku leh deegaanka. Is qabsiga Seeraar iyo Axmed Madoobe oo iyaga oo sacabooleey ah Nairobi ka wada yimid kadibna si siman u bilaabay abaabulka dagaalkii Xarakada Shabaab looga saaray magaalada Kismaayo waxa uu abuuri karaa xaalad dagaal oo dib u dhac ku keenta nabadda iyo horumarka kooban ee ka jira JL, waxa uuna saamayn taban ku yeelan doonaa mustaqbalkooda siyaasadeed.

Sidii JL ay shaley magan ugu ahayd gacmo badan oo isugu jira kuwa dawladda dhexe iyo dawladaha Kenya iyo Itoobiya ayay maantana magan ugu tahay saamaynta caynkaa ah. Axmed Madoobe waxa uu u muuqdaa inuu taageero ka helayo Nairobi iyo Garisa iyada oo

ay taageeradaasi suurtogal tahay inay is bedesho xilli kasta, gaar ahaan haddii uu soo muuqdo musharax kalsooni ka heli kara Kenya, oo ay si toos ah u taabanayso xasilooni darro kasta oo ka dhacda JL.

Dhanka kalana Addis Ababa iyo Jigjiga oo uu Axmed Madoobe ku xisaabtami jiray ayaan taageero badan u haynin, waana halka ay dawladda dhexe quud-daraynayso in ay ku bixin karaan Axmed Madoobe, warar lala isla dhexmarayo Muqdisho, Kismaayo iyo Nairobina waxa ay sheegayaan in mas'uulin ka socda dawladda dhexe ay ku sugan yihiin Addis Ababa, inkasta oo xiriirka istiraatiijiyadeed ee Nairobi iyo Addis Ababa uu mudnaanta koowaad leeyahay marka ay timaaddo qaabaynta siyaasadda, gaar haan JL iyo guud ahaan Soomaaliya. Waxaa xusid mudan in qiimaha ugu yar ee dawladda dhexe ay ku heli karto taageerada Kenya ay tahay iyada oo gorgortan ka gasha kiiska badda, oo ay Kenya aad u danaynayso in wadaxaajood lagu kala baxo, kaasoo u muuqda mid ku adkaan doona dawladda dhexe inay u bareerto xilligan.

Cabsida laga qabo xasilooni darro

Cabsida laga qabo xasilooni darri ka dhacda JL aad ayay u saraysaa, waxaana cabsidaa sii xoojinaya in gebi ahaanba ay meesha ka maqan tahay kaalintii ay qaadan lahaayeen samadoonno waxgarad ah oo aanan damac siyaasadeed ka lahayn doorashada ka dhacaysa JL oo u istaaga sidii looga hortagi lahaa in deegaanku dib ugu laabto dagaaladii sokeeye.

Waxyaabaha cabsida sii kordhinaya waxaa kamid ah in hanaanka xulista xubnaha baarlamaanka ee uu tilmaamay gudoomiyaha gudiga xuduudaha iyo doorashooyinka JL, Xamsa Cabdi Aar uu yahay mid xasarad abuuraya maadaama ay shardi ka dhigeen in magacyada xildhibaanada JL ee waqtigoodu dhamaaday ay qasab yahay in lagu soo daro liiska xubnaha 3da ah ee u sharaxan baarlamaanka cusub, iyadoo guddiga doorashadu yahay cidda iska leh xaqa xulista, taasoo meesha ka saaraysa xaqii beesha uu

xildhibaanka matalayo ay u lahayd xulista xildhibaankii danahooda metali lahaa, wuxuuna arrinkan horseed u yahay kelitalisnimo ka bilaabnaysa guddiga doorashada kuna dhamaan doonta madaxweynaha la doorto. Waxaa kale oo cabsida sii kordhinaya in dawladda dhexe, siyaasiyiinta iyo dhaqanka JL aanay ku hawlanayn ka doodista iyo sixitaanka hanaanka doorashada, ee keiya ay ku mashquulsan yihiin arrimo aysan suurogal ahayn in laga gun gaaro haddii aan la sixin hanaanka doorashada.

Waxaa intaa dheer in hanaanka sugidda amniga oo ah midka horseeday isku dhac Cabdinaasir Seeraar iyo Axmed Madoobe uu yahay arrin kale oo culays keeni karta haddii aan la helin samadoono waxgarad ah oo isu dheelitira:-

1- Ilaalinta xasiloonida.

2- Sixitaanka hanaanka doorashada si sharciyaddu u xoogaysato,

3- In musharaxiintu helaan ilaalo ay ku kalsoonaan karaan.

Waxa ay u muuqataa in maamulka JL markii uu dejinayay hanaanka sugidda amniga doorashada iyo midka musharaxiinta uu xeerinayay in aysan xasiloonidu lumin, maadaama musharax kasta oo imanaya magaalada Kismaayo ilaalada uu doonayo inay soo dhaweeyaan, amnigiisana ilaaliyaan ay tahay xubnaha jufadiisa ah ee ka tiran ciidanka JL, taasoo keenaysa in ciidamadu kala raacan musharaxiinta reerahooda, halkaana ay ku lunto midnimadii yo wada-shaqayntii ciidanka dhexdiisa ahayd.

Dhanka kalese musharaxiinta ayaa u arka in Axmed Madoobe oo qudhiisa ah musharax isla markaana ciidamadu ay isaga toos uga amar qaataan, aysan suurogal ahayn in uu amaankooda mas'uul ka noqdo maadaama ay ku wada jiraan loolanka doorashada.

Ma laga fursan karaa qulqulatooyin siyaasadeed

Sida aan horay u soo sheegnay maamulka JL waxa uu ku aasaasmay xaalad gaar ah, waxaana saamayn ku lahaa gacmo badan, waxaa kale oo uu u nugul yahay in si sahlan uu khilaafka siyasaadeed isugu bedelo dagaal beeleed hoos ugu sii daadaga dagaal jufo.

Xasilooni darro kasta oo ka dhacda JL wax ay si toos ah saamayn ugu yeelanaysaa geeddi-socodka siyaasadda dalka, haddaba si looga fursado in doorashada JL ay abuurto xasilooni darro waxaa muhiim ah in la qaado talaabooyin dhawr ah oo ku aadan in ay meesha ka dhacdo doorasho sharciyadeedu sararyso, oo hanaanka iyo hab-raaca doorashaduba ay noqdaan mid wadar-ogol ah, sidoo kalena waa in hanaanka sugidda amaanku aanu noqon mid caqabad ku ah musharaxiinta iyo siyaasiyiinta loolanka kula jira Axmed Madoobe, isla markaana waa in ilaalo laga hayo wax kasta oo keeni kara inay kala dhantaalanto wadajirka iyo wadashaqaynta hay'adaha amniga.

Gunaanad

Jubaland oo ah deegaan ay ku dhan yihiin afarta qaybood iyo barka (4.5) ay Soomaalidu wax u qaybsato, horayna ay uga jirtay tabashooyin la xiriira saami qaybsiga, taasoo ay weheliso loolanka siyaasadeed ee ku aadan doorashada soo socota, dagaalka Xarakada Shabaab, Abaaraha, ciidamada kala gedisan ee hoos taga AMISOM, kuwa Maraykanka, khilaafka xuduudda badda ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Kenya, ayna u dheer tahay khilaafka JL kala dhexeeya dowladda dhexe iyo hardanka siyaasadeed ee gobolka ka aloosan "geopolitics" waxa uu xaalkeedu ku dambayn doonaa saddex arrin midkood:-

1- In sida uu Cabdinaasir Seeraar sheegay ay albaabada naartu ku furmaan oo ay xasiloonidu geed dheer ku laalanto, kadib marka musharax kasta uu magaalada yimaado isaga oo ay soo dhawaynayaan gaarna ka noqonayaan ciidamada jufadiisa ah ee ka tirsan maamulka JL, kadibna uu magaalada ka dago aag uu isku ilaaliyo, ciidamada

maamulkana ay isku dayaan inay hor istaagaan arrinkaa. Iyadoo dhanka kalana hanaanka doorashadu uu yahay mid uu maamulka keligii garwadeen ka yahay.

2- In dawladda dhexe oo kaashanaysa ciidamada AMISOM ay la wareegto amaanka magaalada Kismaayo, si toos ahna iyadu u maamusho doorashada, taasoo marka laga tago qalalaasaha amni ee ka dhalan kara aanay natiijadu qasab ahayn inay bixiso Axmed Madoobe oo keliya balse ay u badan tahay in Axmed iyo Seeraar isla baxaan, isla markaana ay dawladdu ku fashilanto inay guul u hanato musharaxa ay door bidayso, iyadoo xitaa haddii uu gullaysto musharaxa dawladdu aanay jirin damaanad ku aadan in khilaafka kala dhexeeya JL uu ka yaraado.

3- In la helo samatalis waxgarad ah oo ku qanciya saamilayda siyaasadda ee JL inay dhacdo doorasho sharciyadeedu sareyso, taasoo ku iman karta in dedaal lagu bixiyo in hanaanka doorashadu noqdo mid daahfuran oo la isla ogol yahay, uuna jiro axdi sharafeed ay u wada hogaansan yihiin dhamaan saamilayda siyaasadda, iyo in dawladda dhexe ay dib u eegis ku samayso qaabka ay falceliska uga bixinayso doorashada, waxaana haboon intii daaha gadaashiisa ay wax ka farsamayn lahayd, inay adeegsato awoodaheeda dastuuriga ah, si mug leh oo toganna u qaadato kaalinta kaga aadan doorashada, kana fogaato wax kasta oo dhalin kara tuhun sababa xasilooni darro.

Qodobkan dame haddii lagu guuleysto waxa uu horseedi doonaa in hanaan dimuquraadiyadeed uu ka hana qaado JL, kaasoo mustaqbalka horseedi doona in xal loo helo tabashooyinka ay qabaan qeybo badan oo kamida bulshada JL.

Tixraac

1- Iska-horimaad ka dhacay garoonka diyaaradaha Kismaayo, https://www.garoweonline.com/so/news/somalia/khasaaro-ka-dhashay-iska-hor-imaad-ka-dhacay-garoonka-diyaaradaha-kismaayo.

2-Abdinasir Seeraar: Axmed-madoobe Albaabka naarta ayuu furay, https://www.youtube.com/watch?v=5wQyK0trX9M

3- Jubaland oo dawladda federaalka ku eedeysay farogelin, https://www.jowhar.com/wararka/jubbaland-oo-dowladda-federaalka-ku-eedeysay-faragelin-iyo-khal-khal-gelinta-amniga.html5

4-Sooyaalka Khilaafka Dowladda Federaalka Ah Iyo Maamul Goboleedyada Ee 5ta Bil Jirsaday!, https://goobjoog.com/akhriso-sooyaalka-khilaafka-dowladda-federaalka-ah-iyo-maamul-goboleedyada-ee-5ta-bil-jirsaday/

Khilaafka maamulka Galmudug oo kasii daraya, https://www.voasomali.com/a/4623964.html

5- Shariif Xasan oo is casilay kana tanaasulay tartankii doorashada madaxweynaha Koofur Galbeed, https://goobjooge.net/degdeg-shariif-xasan-oo-is-casilay-kana-tanaasulay-tartankii-doorashada-madaxweynaha-k-galbeed/

6- Shacab Careysan oo Wasiiro ka tirsan Jubbaland ku dhaawacay banaanbax ka dhacay Garbahaarey, http://www.dadweynaha.com/shacab-careysan-oo-wasiiro-ka-tirsan-jubbaland-ku-dhaawacay-banaanbax-ka-dhacay-garbahaarey/

7- Gudoomiyaha Rugta ganacsiga Jubbaland oo lagu xanibay Garoonka Aadan Cadde, http://marqaannews.net/2018/10/deg-deg-gudoomiyaha-rugta-ganacsiga-jubbaland-oo-lagu-xanibay-garoonka-aadan-cadde/

8- Maxaa kajira in wafdi ka socda Jubbaland uu ka baxay shirka Brussels, https://www.somaliatoday.so/2018/07/16/maxaa-kajira-in-wafdi-ka-socda-jubbaland-uu-ka-baxay-shirka-brussels/

9- Taliye loo diiday Kismaayo oo ka degay Garbahaareey., https://allsbc.com/taliye-loo-diiday-kismaayo-oo-ka-degay-garbahaareey/

10- Axmed Madoobe oo Wacad ku maray in Shabaab ka sarayaan Bu'aale, http://allsbc.com/axmed-madoobe-oo-wacad-ku-maray-in-shabaab-ka-sarayaan-buaale/

11- Dawaldda Soomaaliya oo heshiis qarsoodi ah la galaysa Axmed Madoobe, https://goobjooge.net/kashifaad-dowladda-somalia-oo-heshiis-qarsoodi-ah-la-galeysa-axmed-madoobe-yaa-ka-danbeeyay/

Ra'iisul Wasaare Kheyre Iyo Axmed Madoobe Oo Kulan Ku Leh Kismaayo, https://goobjoog.com/raiisul-wasaare-kheyre-iyo-axmed-madoobe-oo-kulan-ku-leh-kismaayo/

Axmed Madoobe oo faahfaahiyay heshiiska uu la galay Villa Soomaliya, https://www.garoweonline.com/so/news/somalia/axmed-madoobe-oo-fahfaahiyay-heshiiska-uu-galay-villa-soomaaliya

12- H.E Ali Bunow Korane (https://twitter.com/honalikorane/status/1084414365997170688?lang=en)

13- Sida ku xusan faqradda 1aad, qodobka 93aad ee dastuurka JL : Iyadoo ay wadaxaajood ay ka galataan Dawlad Goboleedka Jubaland iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Soomaaliya, waxay Jubaland aasaasi doontaa Gudiga Madaxabanaan ee Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubaland, dawlad goboleedkuna uu noqdo xubin muhiim ah, oo kamid ah Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Soomaaliya.